

ILAALI XUQUUQDAADA MADANIGA AH

XEERKA XUQUUQDA AADANAHA EE MINNESOTA

Sharciga Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota (Minnesota Human Rights Act) wuxuu u shaqeeyaa si loo hubiyo in dhamaan dadka Minnesota ay ku noolaadaan nolol sharaf leh, kana madax banaan takoor. Ilaalinta xuquuqaha madaniga ee dhamaan dadka Minnesota waxay muhiim u tahay dhisida Minnesota oo horumarta oo lahaata farxad badan.

WAA AYO DADKA SHARCIGANI UU ILAALIYO



XAALADAHA LA ILAALIYO

DHINACYADA LA ILAALIYO

	Shaqada	Guriyeynta	Goobaha Dadweynaha	Adeegyada Dowlada	Waxbarashada	Amaahda	Ganacsiga
Asalka	●	●	●	●	●	●	●
Midabka	●	●	●	●	●	●	●
Caqiidada	●	●	●	●	●	●	
Diinta	●	●	●	●	●	●	
Asal Qarameed	●	●	●	●	●	●	●
Jinsiga	●	●	●	●	●	●	●
Xaalada guurka	●	●	●		●	●	
Naafonimada	●	●	●	●	●	●	●
Gargaarka Dadweynaha	●	●		●	●	●	
Da'da	●				●		
Jinsi doorashada	●	●	●	●	●	●	●
Aqoonsiga jinsiga	●	●	●	●	●	●	●
Xaalada Qoyska	●	●					
Wax Laqabadka Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Deegaanka	●						

DOORKA WAAXDA



Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota (MDHR) ayaa fulisa xuquuqda madaniga

ee Minnesota. Baarayaasha ayaa la shaqeeya

shakhsiyaadka aaminsan in la takooray si loo go'aamiyo in MDHR ay ka caawin karto xaalladooda. Haddii MDHR ay caawin karto, shaqaalaha ayaa waxaa laga yaabaa in ay ku taliyaan in la sameeyo dhexdhexaadin ama diyaarinta dacwad takoor.



Haddii eedayn dambi la diyaariyo, MDHR ayaa waxay qabataa baaritaan ay dhexdhexaad ka tahay.

Haddii MDHR ay ogaato in takoorid la sameeyey sida uu sharcigu qabo, shaqaalaha ayaa ka shaqayn doona xalinta kiiska. MDHR waxay sidoo kale u gudbin kartaa kiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Minnesota si uu dacwad u oogo.

NALA SOO XIRIIR

Haddii aad rumeysan tahay in lagu takooray, nala soo xiriir. Tarjumaad iyo/ama qoraal tarjumaad ayaa lagu heli karaa. Qofku wuxuu haystaa hal sano laga soo bilaabo taariikhda ficilka takoorka ah uu dhacay in uu dacwad ka xareeyo MDHR.



Khadka Caawinta Takoorka:

1.833.454.0148

Khadka Laliska (MN Relay):

711/ 1.800.627.3529

E-mailka: info.mdhr@state.mn.us

Saacadaha: 8 a.m. ilaa 4:30 p.m. Isniinta ilaa Jimcaha.

**Xafiiska Guud ee
St. Paul**

540 Fairview Ave N,
Suite 201
St. Paul, MN 55104

**Xafiiska Qaybta ee
St. Cloud**

400 2nd Street South
St. Cloud, MN 56301



Soo booqo mn.gov/mdhr si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Markii la codsado, buugyarahan waxaa lagu heli karaa qaabab kale ee loogu talagalay shakhsiyaadka naafada ah iyada oo la wacayo lambarada MDHR ee kor ku xusan.